

Ka dhaafidda karantiilka soo gelidda

Dadka si buuxda u tallaallan iyo dadka covid-19 ku dhacay lixdii bilood ee u dambeeyay waxa laga dhaafayaa karantiilka soo gelidda waddanka laga bilaabo Jimce 11-ka Juun saacadda 1500. Waxa shardi ah in ay caddayn karaan tallaalka ay qaateen ama in cudurku ku dhacay, iyagoo isticmaalaya nidaam la hubo lana xaqiijin karo oo QR leh. Carruurta iyo dhallinyarada ka yar 18 sanno waa ay soo gaabin karaan karantiilka soo gelidda haddii ay tijaabo PCR ah iska qaadan saddex maalmood kaddib oo waayo laga cudurka.

- Dadka si buuxda u tallaallan ama covid-19 ku dhacay lixdii bilood ee u dambeeyay, islamarkaana arrintaas u caddayn kara hab la hubo lana xaqiijin karo, waa laga dhaafayaa karantiilka soo gelidda laga bilaabo Jimce 11-ka Juun saacadda 15. Si kastaba waa in tijaabo laga qaado marka ay xuduudda yimaadaan, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

- Dawladdu wax-ka-beddelladan ayay hadda samaynaysaa, waayo waxa soo badanaya qaybta dadka tallaallan islamarkaana inta badan dadka nugul waxa ay fursad u heleen in ay qaataan cirbadda koowaad ee tallaalka. Waxa xilli dhow diyaar noqon doona nidaam lagu xaqiijin karo caddaymaha tallaalka la qaatay ee ka soo baxay aagagga Midowga Yurub/EØS iyo Ingiriiska, ayuu yidhi Høie.

Dadka si buuxda u tallaallan ama covid-19 ku dhacay ee haysta shahaado koroona oo aan lagu xaqiijin karin xuduudda Norway, ma ka mid aha dadka karantiilka laga dhaafayo laga bilaabo Jimce 11-ka Juun. Dadkan waxa karantiilka laga dhaafi doonaa marka Norway lagu xidho nidaamka Midowga Yurub oo la xaqiijin karo caddaymaha laga keeno waddamada kale. Wax-ka-beddelladani waxay waafaqsan yihiin talooyin ka yimi Machad Caafimaadka Dadweynaha iyo Agaasinka Caafimaadka.

Dawladdu waxa ay toddobaadkii hore bilowday in shardiga karantiilka soo gelidda waddanka loo debsiyo carruurta ka yar 12 sanno. Hadda karantiilka ayay ka bixi karaan haddii ay tijaabo iska qaadan cudurkana laga waayo, marka ay ugu yaraan saddex maalmo ka soo wareegto xilliga ay yimaadaan waddanka. Waxa hadda nidaamkan lagu soo darayaa dadka u dhexeeya 12 iyo 18 sanno jir.

Karantiilka soo gelidda ee dadka qaatay hal cirbad oo tallaah ah

Dadka difaacan ee 3 ilaa 15 toddobaad ka soo wareegtay markii ay qaateen cirbadda tallaalka, waxa laga rabaa in ay karantiil galaan. Toddobaadkii hore dawladdu waxa ay wax-ka-beddel ku samaysay xeerarka karantiilka soo gelidda, si dadkani u soo gaabin karaan karantiilka haddii ay saddex maalmo kaddib iska qaadaan tijaabo PCR ah oo cudurka laga waayo. Si looga dhaafo karantiilka waxa shardi ah in qofku caddeeyo in uu tallaallan yahay isagoo isticmaalaya nidaam la hubo lana xaqiijin karo oo QR leh.

Sababta dadkan difaacani ay weli u gelayaan karantiilka ayaa ah in dadka cirbadda koowaad oo keliya lagu tallaalay u nugul yihiin qaadista cudurka. Weliba waxa muuqata in hal cirbad oo keliya qofka si fiican uga difaacayn noocyada cusub ee fayruska, tusaale ahaan nooca deltada, marka la barbardhigo nooca alfada.

Taas ayaa keentay in Machadka Caafimaadka Dadweynaha iyo Agaasinka Caafimaadku aaminsan yihiin in loo baahan yahay in dadkaasi weli galaan karantiilka soo gelidda, laakiin loo soo gaabiyo haddii ay keenaan tijaabo cudurka laga waayey oo la qaaday saddex maalmo kaddib.